

6 Shay Oo Ay Tahay Inaad Ka Ogaato Horumarka Aqoonta

Waa maxay horumarka aqoontu?

Horumarka aqoontu waa isbarbardhiga waxqabadka ardayga ee sannad iyo ka ku xiga, iskugaynta heerarka dugsiga hoose iyo dhexe ee kooxda arday kasta. Tani waxa loogu xisaabiyaa si gaar ah Luuqada Ingiriisiga (ELA) iyo xisaabta.

Muxuu muhiim u yahay horumarka aqoontu?

Si uu ardaygu uga qalinjabiyo dugsiga sare ee diyaargarawga shaqada, arday kastaaba waa inuu samaynayaa horumar sannadle ah oo ku waajahan la kulanka filashooyinka gobolka. Horumarka aqoontu waxa ay ka kaalmaysaa dugsiga hoose iyo dhexe inay la kulmaan baahiyaha ardayga ee ah in laga taageero inuu ardaygu hore usii socdo si uu uga qalinjabiyo dugsiga sare.

Maxay Maine u samaysaa houmar aqooneed?

Xeerka federaalka ee Guusha Arday Kastaa (ESSA) waxa uu u baahan yahay in gobol kastaa uu yeesho nidaam isla xisaabtan kaasi oo ay kujiraan korodhka aqoonta oo muujinayana horumarka iyo guusha dugsiga.

Xogtu halkay ka timiday?

Xogta horumarka aqoonta ee kasoo baxday Qiimayntii Waxbarashada ee Maine (MEAs). Heerarka saddex ilaa siddeed, xogtani waxa ay ka timiday qiimaynta eMPowerME ee xisaabta iyo Luuqada Ingiriisiga (ELA). Horumarka aqooneed laguma xisaabiyo heerka dugsiga sare.

Waa maxay hadafka Maine ee guushu?

Arday kasta oo ahaa dugsi sare ama hoose oo iskumid ah laba sano oo isku xiga waxa lagu dari doonaa dhibcaha horumarka. Dhibcuhu waxa ay u taagan yihiin isbar-bardhig lagu samaynayo sannadkan hadda iyo kii hore, waa la isku gaynayaa waxana lagu celcelinayaa tirada guud ee ardayda. Dhibcaha la isku geeyay oo ah 100 waxa ay muujinayaan korodhkii sannadka ee la rajaynayay. Horumarka waxa lagu xisaabiyaa ELA iyo xisaabtaba dhammaan shakhsiyaadka xaqa u leh kooxaha ardayda.

Sidee buu u eegi doonaa kaadhka warbixinta ee ardayga?

Dugsiga hoose ama ka dhexe, guud ahaan, waxa ay heli doonaan qiyaasta waxqabadka ELA/aqoonta iyo xisaabta la xidhiidha sida shakhsiyaadka ardayda guud ahaan ay u buuxiyaan filashooyinkii gobolka ee horumarka aqoonta.